IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية 1980 L. 2 R 10

Sannadka 8aad Muqdisho 29 Oktoobar 1[redacted]

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

# KOOBNIIN

## AMAR MADAXWEYNAHA J. D. S.

AMAR Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 1 ee 21 Oktoobar 1980, ku soo rogid Dalka J.D.S. Xukun deg deg ah .

AMARKA Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 2 ee 21 Oktoobar 1980, laalid Qodobbada Dastuurka iyo Shuruucda aan la socon karin Xukun deg deg ah.

MARKA Madaxweynaha JDS, Lamb. 3 ee 23.10.1980 Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

AMAR Lamb. 4 ee 23.10.1980, Magacaabid Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

AMARKA Madaxweynaha JDS Lamb. 5 ee 23.10.1980 Dhismaha Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka JDS

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS Lr. 6 taariikh 28.10.80 Isku bedilid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaan.

---

QAYBTA 1aad

SHARCI

SHARCI L. 27 ee 23 Oktoobar 1980, Xeer Sharci Kordhin Mushaharka Shaqaalaha Joogtada ah Dawladda.

QAYBTA LABAAD

XEER Madaxweynaha JDS, L. 96 ee 26 Okt. 1980 u gacan Bannayn Xubnaha GSR Hawlaha Guddiyada.

AMARKA Madaxweynaha J.D.S. Lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980 ku soo rogid Dalka Xukun deg deg ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 83 iyo 113/2 ee Dastuurka;

IYADOO LA TIXGELIYEY : weerarka joogtada ah oo Axmaarada iyo xulafadeedu ku hayaan Dalka Jammaalin walbana soo badanaya;

IYADOO LA TIXGELIYEY : Dhibaatooyin badan ee ka soo kordhey Qaxootiga faraha badan ee Dalka Jooga, maalin walbana soo badanaya;

IYADOO MUUQATAY : In la qalloociyey himiladii iyo ujeeddadii Kacaankii 21ka Oktoobar 1969, taasoo ah; musuqmaasuq, qaraabokiil, eex, cadaalad iyo sinnaan darro iyo shaqo curyaamin maamulka iyo Xisbiga dhexdiisa ku badatay muddadan dambe;

MARKII LA ARKAY In ay lagama maarmaan tahay in Dalka oo dhan lagu soo rogo laguna dhaqo ilaa iyo inta ay umuurtu caadigeedii ku soo noqoneyso, xukun deg deg ah oo kafaale qaadaya :

a) In duruufta adag ee Dalku marayo uruursanaan iyo midnimo looga gudboo;

b) In mabaadi'dii iyo himiladii Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 lagu soo celiyo marinkeedii dhabta ahna ee laga weeciyey

ISAGOO KU ISTICMAALAYA : Awooddii aan caadiga ahayn oo lagu siiyey Qod. 83aad ee Dastuurka;

DHEGEESTYNA Guddiga Difaaca Qaranka;

WUXUU SOO SAARAYAA

AMARKA SOO SOCDA;

QODOBKA 1AAD

Waxaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya dhammaantii lagu soo rogay Xukun deg deg ah marka laga bilaabo 3da aroornimo oo maalinta talaadada oo taariikhdu tahay kow iyo labaatan bisha Oktoobar

## QODOBKA 2AAD

1) Si dhibaatooyinka kor ku sheegan degdeg iyo habsami wax looga qabto, waxaa dib loogu yeerayXubnihii hore ee Golihii Sare ee Kacaan oo ku shaqayn doona qaab Gole oo masuuliyad wadajir ah leh, waxaana Shirguddoomiye ka naqanaya madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

2) Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu u kala baxayaa guddiyoo dhismahooda iyo xilalkooda lagu tilmaa mi doono Xeer gaar ah.

3) Hay'adaha dastuuriga ah ee Qaranka, sida Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda, sidoodii ayay u wadanayaan hawlaha caadiga ah ee aan ka hor imaanayn Xukunka degdegga ah.

## QODOBKA 3AAD

Qof kasta oo Soomaali ah ama Dalka ku nool waa inuu dhowraa nidaamka Xukuka deg degga ah. Qofkii ku gefa waxaa lala tiigsanayaa Sharciga.

## QODOBKA 4AAD

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 3da aroornimo ee 21ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Amarka Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 2 ee 23ka Okt. 1980 laalid Qod. Distuurka iyo Shuruudaha aan la socon karin Xukunka degdegga ah.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 83aad ee Dastuurka .

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha J.D.S. lambar 1 ee 21kii Oktoobar 1980.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la laalo qodobbada Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka oo aan la socon karin Xaaladda Xukunka Deg Degga ah.

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda

QODOBKA 1aad

Tan iyo inta ay socoto xaaladda Xukunka Deg Degga ah ee ku tilmaaman Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21kii Oktoobar 1980, waxaa la laalay Qodobbada Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka oo ka horimaanaya ama aan la socon kareyn dabeecadda Xukunka Deg Degga ah.

QODOBKA 2aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23.10.1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Amaraka Madaxweynaha J.D.S. L. 3 ee 23ka Oktoobar 1980, Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad iyo 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha JDS lr. 1 ee 21ka Oktoobar 1980;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in la qaabeeyo awoodaha iyo hawl gelinta Xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka ee dib loogu yeeray si loo toosiyo qallooca galay majaraha Kacaanka 21ka Oktoobar 1969

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

QODOBKA 1aad

Waxaa la magacaabay Guddiyada soo socda:

1. Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada;
2. Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda;
3. Guddiga Siyaasadda;
4. Guddiga Bulshada;
5. Guddiga Xisaab Xil Ma Leh.

Guddiyada oo dhan waxay hoos imanayaan Madaxweynnaha JDS.

QODOBKA 2aad

Guddiyada ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Amarkan waxay ka koobnaanayaan xubno ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka oo lagu magacaabayo XEER gaar

## QODOBKA 3aad

Guddiyadu waxay fulinayaan xilalka iyo howlaha soo socda:

1. Toosinta ujeeddooyinka iyo himilada Kacaanka ee la qallooociyey,
2. Dib u habeynta maamulka guud ee Hay'adaha,
3. La dagaallanka shaqo curyaaminta, xatooyada xoolaha dadweynaha, maamul xumada, qaraabakiilka caddaalad iyo sinnaan darrada;
4. Ciribtirka qabyaaladda, afmiinshaarnimada iyo fidinta wararka beenta ah;
5. Hubanti gelinta fulinta iyo ku dhaqanka shuruucad Dalka,
6. Ilaalinta nabadgelyada iyo badbaadada Ummadda iyo Daafaca Dalka;
7. Kormeerka, toosinta iyo talo ka bixinta tacab kordhinta iyo horumarinta dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maaliyadda Qaranka.
8. Kormeerka iyo u hawl-galka fulinta siyaasadda gudaha iyo ta dibadda ee Dalka;
9. Wax alla wixii la xiriira taabbagelinta ujeeddada Xukunka Deg Degga ah.

## QODOBKA 4aad

1. Guddi waliba wuxuu awood u leeyahay in uu qaado

   tallaabo kasta oo lagama maarmaan u ah gudashada hawsha loo xilsaaray.
2. Gaar ahaan Guddi kasta wuxuu baari karaa, xaqii-

daya ciddii maamul xumo ama gef kale ay ku cad-daato tillaabada ku habboon ee Sharciga ah.

QODOBKA 5aad

Guddi kasta wuxuu yeelan karaa Guddi Hoosaadyo ka kooban dad aqoon xirfadeed iyo waayo aragnimo leh.

QODOBKA 6aad

Xilalka, waajibaadka, qorshaha iyo howl-galka Guddi kasta waxaa lagu soo saarayaa guddoon gaar ah.

QODOBKA 7aad

Si loo habeeyo waxqabadka iyo wargelinta Guddiyada, Madaxweynuhu wuxuu xubin ka mid ah Golaha Sare ee Kacaanka u magacaabayaa xilka Guddoomiyaha Xaghaynta Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

QODOBKA 8aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23.10.1980

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.

AMAR L. 4 ee 23 Okt. 1980, Magacaabid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY: Qodobka 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha JDS lr. 1 ee 21 Oktoobar 1980, kuna saabsan Xukunka Deg Degga ah;

MARKUU ARKAY: Amarka lr. 3 ee 23ka Oktoobar 1980, kuna saabsan dhismaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

QODOBKA 1aad

Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka ee ku tilmaaman Amarka Madaxweynaha JDS lambar 3 ee 23ka Oktoobar 1980 waxay hoos imanayaan Madaxweynaha JDS, waxayna ka kooban yihiin Jaallayaasha soo socda:

I. GUDDIGA DIFAACA IYO NABADGELYADA

1. S/Guud Maxamed Cali Samatar — Guddoomiye
2. S/Guuto Axmed Suleyman Cabdalla — Ku-Xigeen

II. GUDDIGA DHAQAALAHA, MAALIYADDA IYO GANACSIGA

1. S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil — Guddoomiye
2. G/Sare Axmed Maxamuud Faarax — Ku-Xigeen
3. G/Sare Faarax Waceys Duule — Xubin
4. G/Sare Muuse Rabiile Good — Xubin

III. GUDDIGA SIYAASADDA

| | | |
|---|---|---|
| 1. | S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor | Guddoomiye |
| 2. | G/Sare Maxamed Cumar Jees | Ku-Xigeen |
| 3. | G/Sare Cabdulqaadir X. Maxamed | Xubin |

IV. GUDDIGA BULSHADA

| | | |
|---|---|---|
| 1. | S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax | Guddoomiye |
| 2. | S/Guuto Maxamed Cali Shire | Ku-Xigeen |
| 3. | G/Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abukar | Xubin |
| 4. | G/Sare Cusmaan Maxamed Jeelle | Xubin |
| 5. | G/Sare Cabdi Warsame Isaaq | Xubin |

V. GUDDIGA XISAAB XIL MA LEH

| | | |
|---|---|---|
| 1. | S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf | Guddoomiye |
| 2. | G/Sare Axmed Xasan Muuse | Ku-Xigeen |

QODOBKA 2aad

Jaalle S/Guuto Maxamed Sheekh Cusmaan waxa loo magacaabay Guddoomiyaha Xoghaynta Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

QODOBKA 3aad.

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 23.10.80

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA JDS

Qodobka 82aad ee Dastuurka,
Qodobka 83aad

Lr.

oo
Deg

n loo

si

a

Guddiga Qaranka

1aad

— Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee Xarunta Gobolka fadhiya »
— Taliyaha Qaybta Goliiska ee Gobolka »
— Taliyaha NSSka ee Gobolka »
— Taliyaha Ciidanka Asluubta ee Gobolka »
— Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha ee G. »

2. Guddiga Kacaanka ee Degmadu wuxuu ka kooban yahay;

— Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada Gud.
— Kaaliyaha kowaad ee Xoghayaha Degmada Xubin
— Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ee Deegaanka »
— Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee Xarunta Degmada fadhiya »
— Taliyaha Saldhigga Boliiska ee Degmada »
— Taliyaha NSSka ee Degmada »
— Taliyaha Ciidanka Asluubta ee Degmada »
— Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha ee Degmada »

QODOBKA 3aad

1. Guddi kasta oo kacaan wuxuu yeelan karaa Guddi Hoosaadyo qabanaya xilal gaar ah oo ka mid ah waajibaadka ku tilmaaman Qodobka 6aad ee Amar-kan, waxaana magacaabaya Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmad.

2. Guddi Hoosaadyada waxaa madax u noqonaya xubin ka tirsan Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmada, wuxuuna ka koobnaanayaa Xubno aqoon u leh arrimaha Guddi Hoosaadku ka xil saaran yahay.

QODOBKA 4aad

Guddiga Kacaanka ee Degmada waxaa Tuulooyin-

food oo uu madax u yahay Xoghayaha Unugga Xisbiga ee Tuulada.

QODOBKA 5aad

Fadhiyada Guddiyada Kacaanka ee Gobolka ama kan Degmadu waxay ku ansaxayaan marka ay ka soo qayb galaan saddex meelood laba Xubnaha Guddiga go'aannaduna waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.

QODOBKA 6aad

Guddiga Kacaanka Gobolka iyo kan Degmadu waxay fulinayaan waajibaadka soo socda:

1. Inay Dadweynaha u gurmadiyaan Daafaca Qaranka, iyagoo qaadaya tallaabooyinka ku habboon, kana shidaal qaadanaya awaamiirta iyo siyaasadda guud ee Qaranka iyo ujeeddada Xukunka Deg Degga ah.
2. In ay taakuleeyaan, gacanna ka gaystaan daryeelka Qaxootiga Gobolka ama Degmada ku nool, lana xalliyaan mashaakilka jira Hay'adaha Qaranka iyo kuwa Caalamiga ah ee haya maamulka Qaxootiga,
3. In ay u hawl galaan ciribtirka qabyaaladda iyo goboleysiga,
4. In ay u hawl galaan baabi'inta maamul xumada, eexda, qaraabakiilka, xatooyada xoolaha dadweynaha, sinnaan la'aanta iyo caddaalad darrada, fududeysiga iyo fulin la'aanta shuruucda, xeerarka, go'aannada iyo tilmaamaha Hay'adaha Qaranka,
5. In ay u hawl galaan ciribtirka afmiinshaarnimada iyo fidinta wararka beenta ah;
6. In ay mintidnimo, kormeer iyo hubin ugu hawl galaan shaqo kordhinta, tacab kordhinta iyo xannaanada hantida Dadweynaha;

7. In ay u hawl galaan ka dhex abuuridda bulshada niyad gacaltooyo, wax wada qabad iyo is garabsi oo ku habeysan sare u qaadidda dareenka waddaninimo ee Dadweynaha.

## QODOBKA 7aad

1. Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka iyo kan Degmadu, iyagoo ka wakiil ah Madaxweynaha JDS, la tashanaya Guddiga intiisa kale, waxaa la siiyey awood buuxda oo ay ku fuliyaan ujeeddada Xukunka Deg Degga ah ee ku xusan Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980ka iyo xilalka ku cad qodobka 6aad ee Amarkan. Gaar ahaan waxay soo saari karaan go'aanno leh ku dhaqan ku meel gaar ah, iyagoo:

   a) xadeynaya dhaqdhaqaaqa iyo kulannada qofka si loo badbaadiyo nabadgelyada iyo xasiloonida guud, ama hoggaanka siyaasadeed ee Dowladda;

   b) amraya in la xiro muddo aan ka badnayn sagaashan (90) maalmood, ama la baaro qof ahaan ama hoy ahaan qof kasta oo lagu tuhmo fal ka mid ah falalka sababeeyey Xukunka Deg Degga ah;

   t) siinaya Hay'adaha rayidka ah iyo kuwa Ciidammada Qalabka Sida awood ka baxsan kuwooda caadiga ah.

2. Fulinta Go'aannada ku cad lambarka hore ee qodobkan waxaa ka xilsaaran Ciidammada Nabadgelyada.

## QODOBKA 8aad

Xarigga ku xusan qodobka 7aad, xarafkiisa (b) ee Amarkan, waxaa qofka lala tiigsanayaa haddii falkiisu uusan keenayn in loo cuskado sharciga lambar 1

u

eyn,

ee

soo
amar-
oo
oo

qo-

u

QODOBKA

## Qodobka 11aad

Guddiga Kacaanka ee Golalku wuxuu warbixin ka soo gudbinayaa hawl-gabka Gobolka iyo Degmooyinkiisa ee la xiriira waajibaadka amarkan ku tilmaaman, wuxuuna u soo dirayaa Madaxweynaha JDS, isagoo ogeysiis siinaya Hoggaamada Guud ee Abaabulka iyo Kicinta Bulshada ee Golaha Dhexe XHKS, iyo Wasaaradda D/Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

## QODOBKA 12aad

1. Guddoomiyayaasha Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo kan Degmooyinku waxay xiriir toos ah kala yeelanayaan Madaxweynaha JDS arrimaha saameeya fulinta ujeeddooyinka Xukunka Deg Degga ah.

2. Arrimaha kale ee caadiga ah waxay kala xiriirayaan Hay'adaha ku shaqo leh.

## QODOBKA 13aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa 23ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 23.10.1980

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha J.D.S.

## QAYBTA KOOWAAD

Xeer SHARCI L. 27 ee 23 Oktoobar 1970, ee kordhin Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY : Qodobka 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga Lambar 5 ee 2 Febraayo 1980 (Sharciga Shaqaalaha Dawladda);

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 36 ee 22 Abriil 1972 iyo Xeerka Madaxweynaha Lambar 74 ee 22 Abriil kuna saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda ee Madaxa Bannaan;

MARKUU TIXGELIYEY : Dhibaatada xagga dhaqaalaha ka haysata shaqaalaha Dawladda ee joogtada ah, dhibaatooyinkaas oo ka dhashay ascaarta adduunka oo sare u kacday, raadna ku yeelatay nolosha qofka Shaqaalaha;

MARKUU ARKAY : Inay lagama maarmaan tahay in la daryeelo, lana qaado tallaabo lagu dheellitirayo dhaqaalaha shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda;

ISAGOO TIXGELINAYA : Baahida degdegga ah, dabeecadda iyo nuglaanta arrintan inay khasbayaan in Dawladdu ay ku isticmaasho awoodda ku tilmaaman Qodobka 69aad ee Dastuurka soona saarto Xeer Sharci;

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS lambar 6, taariikh 28. 10. 1980: Isku beddelid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobbada 82 iyo 83 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Amarka Madaxweynaha JDS. lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku dhawaaqidda xaaladda Xukunka deg degga ah;

MARKUU ARKAY : Amarrada Madaxweynaha JDS. lambar 3 iyo lambar 4 oo ku saabsan dhismaha iyo Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU TIXGELIYEY : aqoonsadayna in ay lagama maarmaan tahay in la isku beddelo xubno ka mid ah Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA :

Amarka soo socda :

Qodobka 1aad

1. Jaalle G/Sare Axmed Xasan Muuse oo ka tirsan Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka waxaa lagu wareejiyey Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee Golaha Sare ee Kacaanka;

2. Jaalle G/Sare Faarax Waceys Duule oo ka tirsanaa Guddiga Dhaqaalaha GSK waxaa lagu wareejiyey Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

Amarkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 28ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 28.10.1980

Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA JDS

## QODOBKA 2AAD

Kororsiimaha ku tilmaaman Qodobka hore ee xeerkan sharci lagama goynayo Canshuurta Horumarinta.

## QODOBKA 3AAD

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelaysa 1da Jannaayo 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Sahcibaga sida uu qabo Qodobka 69aad ee Dastuurka.

MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA J. D. S.

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS lambar 6, taariikh 28. 10. 1980: Isku beddelid Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobbada 82 iyo 83 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Amarka Madaxweynaha JDS. lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku dhawaaqidda xaaladda Xukunka deg degga ah;

MARKUU ARKAY : Amarrada Madaxweynaha JDS. lambar 3 iyo lambar 4 oo ku saabsan dhismaha iyo Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU TIXGELIYEY : aqoonsadayna in ay lagama maarmaan tahay in la isku beddelo xubno ka mid ah Xubnaha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA :

Amarka soo socda :

Qodobka 1aad

1. Jaalle G/Sare Axmed Xasan Muuse oo ka tirsan Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka waxaa lagu wareejiyey Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee Golaha Sare ee Kacaanka;

2. Jaalle G/Sare Faarax Waceys Duule oo ka tirsanaa Guddiga Dhaqaalaha GSK waxaa lagu wareejiyey Guddiga Xisaabi xil ma leh ee Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

Amarkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 28ka Oktoobar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 28.10.1980

Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA JDS

## QAYBTA LABAAD

XEERKA MADAXWEYNAHA J.D.S. lambar 96 ee 26. 10.80

U GACAN BANNAYN XUBNAHA G. S. K. HAWLAHA GUDDIYADA

MADAXWEYNAHA JDS.

MARKUU ARKAY : Qoddobka 82aad iyo 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980 iyo awaamiirta MJDS lambar 3 iyo 4 ee 23ka Oktoobar 1980;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay lagama maarmaan tahay in xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka ee haya xilal maamul ay u gacan bannaanadaan hawlaha Guddiyada lagu magacaabay;

WUXUU SOO SAARAY

QODOBKA 1AAD

Laga billaabo 26ka Oktoobar 1980:

— Jaalle S.Gaas Cabdalla Maxamed Faadil
  Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka

— Jaalle S.Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf
  Wasiirka W. Gaadiidka Badda iyo Dekedaha

— Jaalle G.Sare Axmed Xasan Muuse
  Wasiirka Wasaaradda Beeraha

— Jaalle G.Sare Maxamed Cumar Jees
  Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska

— Jaalle G.Sare Cabdi Warsame Isaaq
  Wasiirka W.Madaxtooyada X. Arrimaha Bulshada

— Jaalle S.Guuto Maxamed Cali Shire
  Maamulha Sare ee Wak. Horumarinta Beeraha

— Jaalle G.Sare Faarax Wacays Duule
  Maamulaha Sare ee Wak. Muuska Ummadda

Waxay u go'doomayaan hawlaha Guddiyada Golaha